

Croup (Somali)

# Infekshanka loo yaqaan Croup



Croup waa infekshan uu keeno fayraska kaas oo ku dhasha neef-mareenka. Fayrasku wuxuu sababaa in larynx (sanduuqa codka), trachea (tubada hawada) iyo bronchi (hawo-mareenada waaweyn ee sambabada) ay bararaan taasoo adkeynaysa inuu ilmahaagu neefsado. Carruurta qabta infekshanka croup waxaa ku dhaca qufac daran, oo qeyladiisu dheertahay waxayna sameyn karaan qeylo, cod sare ah marka ay neefsanayaan.

Infekshanka croup-ku wuxuu inta badan ku dhacaa carruurta da'doodu u dhaxayso 6 bilood iyo 6 sano, laakiin wuxuu saamayn karaa carruurta waaweyn.

Wuxuu u badan yahay xilliyada qaboobaha.

## Calaamadaha lagu garto

Infekshanka croup caadi ahaan wuxuu ku bilaabmaa 1 ilaa 2 maalmood oo ah calaamadaha hargabka caadiga ah (qandho fudud iyo diif). Marka uu fayrasku faafo ilmahaagu waxa laga yaabaa inuu la kulmo:



qufac qeylo dheer (wuxuu u ekaan karaa shaabad)  
cod xabeeb ah



dhawaaq dheer marka aad neefta qaadaneys  
neefta oo ku adkaata  
neefsashada oo ka dhaqsi badan sida caadiga ah  
cune xanuun



abateed la'aan (oo ay ku jirto in xataa aan cabitaan la rabin)

Calaamaduha lagu garto infekshankaan waxay inta badan si lama filaan ah u bilaabmaan habeenkii waxaana laga yaabaa inay soo roonaadaan maalintii.

## Daawaynta

Carruurtu waxay caadi ahaan soo roonaadaan 3 ilaa 4 maalmood iyagoon wax daaweyn ah helin. Dhakhtarku waxa uu kugula talin karaa waxyabaha soo socda si ay uga caawiyaan calaamadaha infekshanka:

- daawooyinka xanuunka sida paracetamol (Panadol ama Dymadon) ama ibuprofen (Nurofen)
- daawo sharoobo ah (steroids) oo loogu talagalay inay daaweyso neefta ilmahaaga ee shanqarta dheer. Tani waxay ku yarayn kartaa neefta ilmahaaga ee shanqarta dheer dhawr saacadood gudahood, laakiin qufacisuu wuxuu sii socon karaa ilaa 2 toddobaad.
- daawo lagu qaadanaayo maaski (nebulizer) hadii calaamadaha xanuunka ay aad u daran yihii.



## Daryeelka guriga

Inta badan kiisaska infekshanka croup waxaa si badbaado leh loogu daweyn karaa guriga. Waxaad ku caawin kartaa ilmahaaga inuu soo roonaado adigoo sameynaya waxyabaha soo socda:

- inaad ilmahaaga dejisid (oohintu way uga sii dari kartaa dhawaqa infekshanka croup)
- inaad ku dhiirigelisid ilmahaaga inuu is toosiyo markuu fadhiyo (tani waxay ka caawin kartaa inuu si fudud u neefsado)
- inaad siisid dawo xanuun baabi'isa sida paracetamol ama ibuprofen. Raac tilmaamaha ku yaal dhalada ama xirmada ay daawada ku jирто si aad u ogaatid qiyaasta saxda ah. Ha siin ilmahaaga wax ka badan inta lagu taliyay in la siiyo maalintii.

Wixii talo caafimaad ah oo aan degdeg ahayn, wac 13 HEALTH (13 43 25 84) si aad ula hadasho kalkaaliso diiwaangashan 24 saacadood maalintii, todobada maalmood ee wiiggii qiimaha wicitaankana wuxuu la mid yahay adoo xaafada aad degan tahay wacaayo oo kale.



Weydiiso turjubaan haddii aad u baahan tahay.

## Goorta loo baahan yahay in la arko dhakhtar

**U tag GP-gaaga haddii ilmahaagu qabo calaamadaha infekshanka croup.** GP-ga aaya baadhi doona ilmahaaga oo ka waraysan doona calaamadaha infekshanka iyo in uu hore ugu soo dhacay infekshanka croup. Badanaa baaritaan in la sameeyo looma baahna.

**Gee ilmahaaga qaybta gargaarka degdega ah (Emergency department) ee kuugu dhow haddii laga helay croup oo xaaladdoodu ka sii darayso.**

**Wac Seddexda Ebar (000) isla markiiba haddii ilmahaagu:**

- uu si boobsiis ah u neefsanaayo
- ay ku adagtahay neefsashada
- uu midabkiisu aad u dhiig furan yahay, buluug ama grey yahay.

Waxaa soo saartay Waaxda Gurmadka Degdeega ah, Isbitaalka Carruurta ee Queensland. Wuxaan qiraynaa talooyinka macaamiisha iyo daryeelyaasha.

**Resource ID:** FS011 **Reviewed:** July 2022

**Cudur-daar:** Macluumaadkan waxaa soo saaray xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka waxaana loogu talagalay in loo isticmaalo tilmaame kaliya iyo in lagu taageero, ee aan lagu beddelin, wadahadalka lala yeelanayo dhakhtarka ilmahaaga ama xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka. Macluumaadka si joogto ah aaya loo cusboonaysiyyaa, markaa fadlan hubi inaad tixraacayso nuqalkii ugu dambeeyay. Raadso la-talin caafimaad, ee markaas ku habboon, walaacyada ku saabsan caafimaadka ilmahaaga.